

# Qorshaha Caafimaadka Oregon Waxaa Kujira Daryeelka si looga hortago Fayraska Sababa Cudurrada Neefta & Sambabada (RSV) ee ku dhaca carruurta



## Carruurta ku jirta halista sare ee da'doodu tahay laba sanno jir waxay xaq u yeelan karaan daawo si looga hortago caabuqa daran ee RSV

Inta lagu jiro xilliga uu socdo RSV ee 2022-2023, Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP) waxaa kujirta cirbada palivizumab (Synagis) ee loogu talagalay carruurta:

- halista sare ugu jirta inuu ku dhaco caabuqa daran ee RSV, ee
- da'doodu tahay laba sanno jir ama wixii ka yar bilowga xilliga RSV (badanaa Nofeembar ilaa Maarso gudaha Oregon).

## Waa maxay RSV?

Fayraska Sababa Cudurrada Neefta & Sambabada (RSV) waa fayras xilliyeed. Carruurta intooda badan, wuxuu ula mid yahay hargab oo kale, oo si iskiis ah ayuu u baxaa. Carruurta ku jirta halista sare, wuxuu u keeni karaa dhibaatooyin xagga neefsashada ah iyo oof-wareen/burunkiito. Tani waxay u horseedi kartaa in loo wado isbitaalka.

[Ogow wax badan oo ku saabsan astaamaha RSV ee dhallaanka iyo carruurta yaryar, iyo marka aad waci karto dhakhtarka.](#)

## Haddii ilmahaagu ku jiro halis sare, wac dhakhtarka ilmahaaga isla markaaba.

U sheeg dhakhtarkaaga haddii ilmahaagu halis sare ugu jiro caabuqa RSV ee daran. Dhakhtarka ayaa laga yaabaa inuu u baahdo inuu weydiiyo ururka isku dubarida daryeelka ilmahaaga (CCO) ansixinta daawada si looga hortago caabuqa RSV ee daran.

Waxaad kuheli kartaa tan luuqad kale, daabacaad ballaaran, ama qaab kale oo adiga kuu wanaagsan.  
Wac 800-699-9075 (TTY 711).

## Maxay tartaa daawada RSV?

Palivizumab (Synagis) waa irbad jeermis-la-deris ah oo ka hortagta caabuqa RSV ee daran. Cirbadaha:

- Waa hal mar bishiiba inta lagu jiro xilliga RSV.
- Waxaa lagu qaadan karaa xafiiska dhakhtarka ama isbitaalka.
- Waxay xoojisaa jawaab-celinta difaaca jirka ee ka dhanka ah u-baylah noqoshada RSV.
- Waxay ka caawin kartaa carruurta halista sare ugu jirta caabuqa RSV ee daran inay iska ilaaliyaan inay u baahdaan daryeel isbitaal.

[Ka ogow wax badan mareegta Synagis.](#)

## Yaa halis sare ugu jira caabuqa RSV ee daran?

Ilmahaaga ayaa laga yaabaa inuu halis ku jiro haddii da'diisu tahay laba sanno jir ama wixii ka yar oo uu dhakhtarka ilmahaagu kuu sheegay in ilmahaagu:

- Qabo cudurka sambabada ee raaga maadaama la dhalay goor hore
- Dhowaan lagu tallaalay wadne kale
- Leeyahay habdhiska difaaca jirka oo daciif ah maadaama lagu tallaalay xubno kale inta lagu gudajiray xilliga RSV
- Qabo yarida falgal-dedejiyeyaasha xuubabka xubnaha iyo calaamadaha lagu garto cudurka sambabada ee daran
- Leeyahay miisaan ama dherer ka yar halbeegga boqqoley-hoosaadka 10<sup>aad</sup>
- La dhalay goor hore (dhicis)
- Qabo dhibaatooyinka sambabada ama neefsashada ee ka dhiga mid adag in la xakameeyo dheecaannada (sida calyada ama duufka)
- Qabo xannuunada wadnaha qaarkood ama cillado

## Ma qabtaa su'aalo?

Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan in ilmahaagu halis sare ugu jiro RSV, weydii dhakhtarka ilmahaaga.

Haddii aad u baahan tahay inaad bixiye daryeel caafimaad u hesho ilmahaaga, [weydii CCO-ga ilmahaaga](#). Haddii ilmahaagu uusan lahayn CCO:

- Ka wac Iskuduwidda Daryeelka ee OHP lambarka 800-562-4620.

- Xubnaha Hindida Maraykanka iyo Dhaladka Alaska ah waxay sidoo kale ka wici karaan Iskuduwidda Daryeelka Qabiilka ee CareOregon lambarka 844-847-9320.

**[OHP.Oregon.gov](https://www.ohp.oregon.gov)**